# Tabaalo!

W/Q. Khadar Iimaan Cige

Juun 22, 2015

Jeclaw ama necbaw wataa aayadaa bannaanka wadhan, obocdeediina quban tahay madbakhii yaraa oo qiiq iyo dambas noqday. Madaxa dhoqoshka ah ee aad mooddo ceel goof ah iyo indhaha laalmay ee aad is odhanayso sammada ta ugu sarraysa ayay malaa'iig u raadsadeen, si cirka jeex loo soo dumiyo oo aan cidba innooga hadhin ee haaddii Xamar ka agdhaweyd oo dhammi isugu timid, ee sidii dameer darraad baqtiday durba fadhanaysa maydkii. Gantaal yoomaaya oo meel baas laga soo diray ayaa salaad hore dusha kaga habsaday afadii Geeddi ee kimista iska dubanaysay. Inkasta oo Cismaan Geeddi wax jecayl oo sidaa ah u haynnin aayadii Maryan, oo uu u arkaayay in ay ka riixatay hooyadii bartii ay ugu jirtay aabbihii. Hooyadiina sidaa nolosha kaga dhacday, oo dhinac kale u raacday tareenka geeddi socodka nolosha. Waxaa maalinkasta lagu yidhaa: "sidii hooyadiin gabadh wanaagsan oo marwo ah u ahayd uun baa odayga idin dhalay inta uu dhuuntay mid kale hoosta ka mehersaday. Maalintaa loogama horreyn oo waatii iyana looga taagi waayay warqaddaa xun ee xaaraanta ah. Markay gacanta ku dhigtay iyo illaa maalinkaa maanta ah ee aynnu joogo, kolba dabaysha ugu xoogga badan ee soo dhacda ayay hadba dhinac ula dayaamaysaa."



Subaxaa aayadii la soo doonay ee sida qasabka ah lagaga mustaafuriyay Adduunka iyada oo cunto u diyaara, bal si ay dharaaro u sii witigwitiglayso ayuu wadnuhu go'ay Cismaan Geeddi oo waxa uu is odhan jiray malaha sidaa ayay naxdin oo dhammi kaaga guurtay oo heeryadii uga qaadatay qalbigaaga, meel dabacda iyo mid damqata toona lagaa soo helo maayo haddii la baadho inta naxariis kugu hadhay, mana hubo sida hadalkaa wax uga jiraan iyo inta uu run noqon karo. Marar badan oo uu isku dayay in uu tijaabiyana wax natiijo ah way uga soo bixi weyday. Malaha maanta ayaa la joogaa goobtii iyo goortii arrintu kala miirmi lahayd dhab iyo dhalanteed tay noqotaba.



**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

“Abbaayo wiilka albaabka innagu xiga galaa habeen oo dhan wuu qarwayaa, waxa uu ku qayliyaa erayo isdhaaf ah oo ma jirto habeen aanu isla kicin,” ayay Istar ku tidhi iyada oo u sheekaynaysa Xaawa oo ay wada ijaarteen qol yar.

“Ilaahiyo kutubka, naa armuu waashaa oo uu innalaayaa. Naa inaadeer guriga ma iskaga baxnaa,” ayay Xaawi ku calaacashay.

“Horta waxaan ku waydiiyay: ma reer xamarbaa?”

“Saas uunbaan is dhahay abbaayo.”

“Haddaa iska daa waxa laga yaabaa dad uu soo laayay in ay habeenkii ku soo gudaan oo ay garaacaan?”

“ Oo kuwii dhintay siday u wax yeellayn karaan miyayna duni kale u safrin, ma waxa aad isku qaldaysaa maytida iyo quruumaha hoose,” ayay tidhi Istar.

“Dhagayso sheekada aan kuu dhammaystiree, anuu ma kasaayo in uu xasuuq gaystay iyo in uu sas iyo anfariir ka qaaday balaayadan habeen oo dhan wareegaysa ee qoryaha ku malluuqan.”

“Labadii bari ee u dambeeyay waxaan maqlaa hadba isaga oo leh: “Isii daaya balaayo Ilaahay idinku ridye bahalayow dugaagga noqday siday u ugaadhsanayeen masaakinta bara kaca ah ee Adduunka dacalladiisa ku firirsan, ee cidina dan iyo muraadka ka lahayn.”

“Maxaa i helay?”

“xaggeen joogaa?”

“maxaa meeshan i keenay?”

“ maxaa la ii xidhayaa ee aan dhimay?”

“yaa i haysta, sawtan warqaddii aqoonsiga qaxoontinimo, haddayna waxba qabanayn maxay igaga dhigayeen ee la ii siiyay faalsadan baas?”

“Haddaanan tan haysannin saw qolka yaree aan dagannay hoosta ka maan soo xidheen, iyo ma xabsi guri ayaad ka door bidaysaa, haa oo saw xabsi ka saxo fiican oo nadiif ah maaha, ta kale maxaa kaa baylahaaya kollayba baagamuunde ayaad ahayde.”

Kun sawir oo kala jaad ah ayaa ku soo hormanaaya maskaxdiisa. Marmarka qaar bahalo iyo xawayaanka kuwa ugu halista badan ayaa caydhsanaya, balaayadaas baa la daba dhigay. Mooyi halkay ka soo raaceen ’e tan iyo yaraantii sidaa uunbuu hurdada uga bogan la’aa oo u salalaayay. Dhawr wadaad oo loo keenayna waxa ay isku waa faqeen badankoodii inuu carruurnimadii jiidhay raas shayddaan isaga oo tu'yar roorsanaaya, saskaasna kama weynaado ee wuu ku


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

waynaaday. Malaha wuu la gaboobayaa oo wuu la god gali si ay isu bahaystaan balaayooyinka kale ee qabriga ku sugaaya ee bakhtiga iyo qudhun kunnoolka ah.

Salalka, daalka, tabcaannimada iyo naxdinta saldhigga ka dhigatay qalbigiisa ee degay ee uu ka qaaday hurdo ku firxadka, waxa uu illaawaa marka uu ku riyoodo gabadh muddo xidhiidh ka dhexeeyay oo quluubtiisa ugaxaantii (uggaxaan) ay saddex sanno ka hor dhigatay kolba raxani ku dillaacdo. Saw kaa maaha dharkii oo dhan ka dhigay ee mudh iyo andariir ka yeelay ee cagaheeda hoostoodii ku libdhay ee aad mooddo midho-xareeraad shanqadh dareemay oo sii quusaaya bi'yo wadaani ku soo dhacayso mid kalena ka sii baxayso. Balaayo ku dhacday wakaa siday ku dhalatay dib ugu celiyay, googaraddii u goglay ee ka xigsiiyay suubaanta, diriciina madaxa ugu maray ee sidii mid u maydhaaya hadba gacmaha dhinac u dulqaadsiinaaya ee dareenkeedii oo dhan walaaqay ee caqligii iyo garashadii ka tahriibiyay si ula kac ah. Hoogto iyana kama ilbaxdo, imisa goor ayay soo ambabartay oo sidii ruux soomiiraabay ay is aragtay iyada oo aad mooddo tulud geel ah oo toban waraabe dhinac kasta ka rudheen oo haaligan, deedna oohin iyo is ciilkaanbi kalyuhu madoobaadeen siday u hiq lahayd. Sawtaa caawana midba meel ka soo qaadday lugaheedii ee haylihii isku masasaqday iyada oo qajilaad iyo murugo aad mooddo tuug lasoo qabtay ee dhuxusha ka madoobaatay. Meeyay milgihii iyo maamuuskii aad lahayd ee in yar ka hor kaa muuqday. Sawtii layaabay isweedhaamintaadii ee labada gaadhi goradda isla galeen ee gigtii ka yeedhay dhagahaaga ka sii yoomaysa. Qarbabacdii baabuurtii isku dhacday ka yeedhay ma waxaa kuugu xigay rafaad, dhidid, taah iyo qadhmuunkaa qooyay bawdyahaaga aad mooddo in kariir xunboo lagu xoqay.



Waxaan si xawli ah u dhex qaadaynnaa oo aannu jibaaxaynaa qashinka, guddaafadda iyo boodhka ku sharraxan xaafadda Islii (Eastleigh, Nairobi) ee Soomaalidu degan tahay. Annaga oo ku siijeedna jeelka weyn'e Islii kuyaalla waa Bangaaniye, halkaa oo ay ku xidhan yihiin Cismaan Geeddi iyo laba kale oo summad laawayaal ah oo lagu baayacaayo luuqadda Sawaaxiliga. Inyar ka hor uun buu u soo gudbey Nayroobi wiilkan saska iyo silicu saldhada ka samaystay ee katiinaddu miciinsatay. Wax dalkugal ah oo uu adeegsanayay may jirin, taana waxaa u sahlay askarta kiiniyaanka ee biilka ka dhigtay bayhoofka iyo habqanka ummad is midha-midhaysanaysa, maan-laawayaal mugdiga ku mirqaama, iftiinkana ku muquurta. Isla judhii aannu gaadhnay saldhiggii waxaa naga soo hor booday oo na warsaday waxaannu raadinaynno sarkaal ka tirsan maamulka xaruntan ciidan, annana u sheegnay u jeeddada aannu meesha u nimid, annaga oo iska hiiftaamayna oo intaa ka dayaynna ciilbax. Intaannaan wax jawaab ah ka helin sarkaalkii dillaal ka ahaa ayaannu garabkayaga bidix ka maqallay:" Dee imika Addoontii way soo qaateen!" Hadalkaasi waxa uu isla markiiba taabtay oo uu xiise galiyay



**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

wiilkii baadiddoonimada igu wehelinaayay. Inta uu cod qosal gariir leh ku dhuftay ayuu yidhi:" gah…gah…gah….hadda ninka sidaa u hadlaya ee dhaxantu isteeshinka ku garaacaysaa waxa meesha kaga xaraysan qaar ka mid ah eheladiisa, markaa ayuu haddana addoon ku tilmaamayaa dad kale isaga oo lahayste ah, ayuu haddana isu haystaa Siciid Barqashkii ka ganacsan jiray addoonsiga dadka Qaaradda Afrika badhkeed. Malaha Sheekh Isaxaaq iyo Ismaaciil Jabartina waxa ay mar ka talinayeen Geeskan Afrika. "Kollay marbay boqorro ka ahaayeen Geeskan Afrika, markaa ayaynnu guumaysanaynay dadkan aad arkaysaa dee wax jira maaha dawlad la'aanta ayay innagu baababasadeene, wax ka tamar yar. Waxba ha eegin waaweynidooda, waxeennaa tafeennada yar yar shan iyaga ka mid ah ayuu u dhigmaa ninkeenna kali ahi. Innaga waxaa la innagu tilmaamaa dadyowga Adduunka ugu firfircoon oo iyaga cuntada ay cunayaan ayaa caajiska badan ku abuurtay," hadalkani waxa uu mar labaad si badheedh ah ugu soo burqaday ninkii addoonta ku tilmaamaayay askarta edegyada ku xaraysatay eheladiisii.  Xisaabta uguma jirto dadkani xilliga ay toosaan, inta saacadood ee ay shaqeeyaan, mana rabo in uu qiyaaso heerkooda aqooneed, mana garan karo, waayo, maba sito cabirkii uu saari lahaa. Annaga oo sidaa isaga amakaagsan oo haddana isaga anfariisan, si qaabdaranna luguhu dhulka noogu yaallaan oo haddana koodhadh maas qaali ah dhaxanta ka jirsanaynna ayay boqollaal soomaaliya oo dhaxan darani ku garacaysay gudaha dayrka saldhigga marka kali ah ku soo rig yidhaaheen oo ku soo urureen, iskuna xeereen Sarkaal ciidan oo ku lebbisan dirayska booliska kiiniya oo laba kale oo quryo dhaadheer oo qaab daran ku jeeni qaarani garab qaadayaan. Goobtii waxa ay isu rogtay, isuna geddiday goob u sansaan eeg saylad dadka laga dhoofiyo.

"Shan kun oo shillin iska bixiya"

"Ma haynno lacag (akuuna beesa)"

"Haddaba iskaga taga ha xidhnaadaane"

"Haddaydaan haynnin maxaa ka soo doonteen, orda oo ehelkoodii u doona?

"Ka warran haddaannu saddex kun oo shillin ku siinno?" Inta uu si kulul noogu qayliyay, iskana dhigay sidii mid xanaaqay ayuu yidhi:

"Waxaa lacag lama yidhaa"

"Soomaalida waan ka yaabay, sideed isku tidhaahdeen lacag la'aan iyo sharci-darro isku darsada?"

"Oo saw kuwan wiilashu aqoonsiyada qaxoontinimo haysata, waa maxay sharci-la'aanta aad sheegaysaa?" Inta uu qosol qaab daran oo si xun uga gariiriyay feedhahiisa ku dhuftay ayuu yidhi: "gah--gah--gah—gah, adeer dalkan UNHCR malaha"  Inta u iska dhigay mid isa soo maslaxay oo kaftan u soo laabtay ayuu yidhi: "horta aan su'aal idin wayddiiyee soomaalidu xaggay waxan oo lacag ah ka keeneen, illeen waa qaxoontiye ? Haddana waxa uu si degdeg ah


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

waydiintii hore u dabo dhigay: “Dalkan waxa ay yimaaddeen iyaga oo aan shillin lacag ah sidan oo cagaagan, haddana waadigaa arka waxa xoolo la kala rogaayo.” Intaannaan uga jawaabin, una ahayn diyaar dooddaa dheer ee goobta ciidan ka dhex bilaabantay ayuu mar saddexaad hadalkii inta uu iska qaatay yidh: “waxaa iska dhaafoo maxaad imika la diyaar tihiin, in aynnu caawa oo dhan is jiidjiidannaa ma fiicnee, idinna aad dhaxanta iskaga hoyataane” Wiil kii ila socday oo xanaaq bastii ah ayaa si kadis ah su’aalahan isu weydiiyay :

“Ma dad dawlad leh ayaa jira mise kuwo aan lahayn?”

“Ma qabiillo ayay ka samaysantaa dawladdu mise wax kale?”

“Ma dad isdulmiyay oo raba in ay is dulkorsanaadaan tan iyo qiyaamaha ayaa haddana ummadnimo sheegan kara?”

“Dadnimadu ma quruxda jidhkaa mise waa wax kale?”

“Isla weynnaantu waa maxay? Se maxay kordhisaa ama isla-weynaanta loobaahan yahay waa ta noocee ah?”

“Xaggay ka timaaddaa shakhsiyad wanaagga ummadeed?”

“Waa maxay bini’aadannimadu?”

Kaddib hadal dheer iyo dood maalaayacni ah waxaannu isla garannay in dadka soomaalida ah ee meesha ku xidhan oodda laga soo qaado oo ay ku jiraan wiilashii aannu u soconney iyo qaar kale oo la jeebbaysnaa. Sarkaalkan iyo asxaabtiisana u laabno xoogaa lacag ururis ah, ku go’ooyin bahalaha dusha madmadaw dugaagga gaajadu laysay. Illeen annagu waxba ka ma dhacno kuwa lacagta sameeya , kol haddii ayna nooga baahnayn in aannu muddo shaqaynno oo waxa ka hadhan inta waagu baryaayo oo kali ah. Waxaa ku filan oo kaliya in aan dhahno: ” bal walal lacag yar ii soo tuur toban cisho ayaan xidhnaa oo adduun badan ayaa la igu soo dameentee .” Waa daliilka qiil u samaynta lacagta mirqaanka, laakiin, waa marag maddoon oo way ka warhaysaa walaashaa in maalinkasta jeelasha lagu sii duubaayo qayrkaa, qarash la’aan awgeedna waallidkood ka hor cabaadayaan xabsiyada iyo maxkamadaha ku baahsan magaalada Nayroobi. Yaabka, amakaagga iyo anfariirku malaha ma dhammaadaan illaa qiyaamaha’e tagsigii (baabuurkii) yaraa ee aannu ku soo daadguraynnay ayaa markali ah shanqadh iyo qaylo isla oogsaday oo isla markii aannu ka soo baxnay isteeshinkii ayay bilaabeen wiilashii madax furashada iyo iska oohinta lagu soo furdaamiyay canaan iyo isweerarid ku dhisan wax is gobolaysi u eeg, balse dhabtu aan sidaa ahayn’e, is kooxaysi qabiilnimo ku salaysan.

“Jabkaa iyo leelleelkaa  idinka ayaa noogu wacan haddaad reer waqooyi tihiin, innaga oo dawladdeennu ka mid tahay kuwa ugu quwadda weyn Geeska Afrika ayaad jabhad iyo balaayo noo bilowdeen. Cuqubo ayaad ka shaqaysateen ummaddii soomaaliyeed” ayuu ku habaartamay


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

wiil lahjad reer bari lehi. Isla markiiba waxaa soo booday mid shaadh cas oo ka dul xidhan shaayad gacmo goos ah, misna ku hadaaqay: ’’Alleylehe idinkaa habaar iyo hoogba idiin sugnaaday oo caddaalad darro, gummaad, iyo xasuuqba gaystay oo sababta jabhad samaysanka iyo burburkaba aabbo u haa. Ilaahay Naarta ha ku fogeeyee Maxamed siyaad Barre sida uu noo lagay waligayo illaawi maynno.” Waa labaatan jir garashadiisu ka dambeeysay dagaalladii, taariikhdana ka akhriyay, kana soo dheegtay qalbiga islaan ayay u ahayd oo laba sanno ka hor socotay.

“Abboowayaal iska aammusa hee, Isaaq iyo Daaroodba waxba isma dhaamaane, annaga oo iska xammaalanna ayaad qori gacmaha noo galiseen, illaa haddana waa ridaynnaa, illaa qaar kale oo naga furfura Ilaahay noo soo dirayo, idinna qofkasta oo aan dilno waa la qaybsanaysaan dambiga dhagar qabaha tan iyo qiyaamaha. Xitaa is qarxinta maannaan aqoonnin ee wiilal waqooyi laga soo diray ayaa nabaray balaayadaas aannu isku baabiinnay.”

Maalinta la xidho waa u oohin iyo isciilkaanbi kumana waantoobaan waxa goobtan guri caska ah furay. Maalinta kalena waa dabbaal dag iyo xaflado abaabul oo waxa ay isu diyaarinayeen wiilashani markii la qabtay in ay ka qayb galaan kow iyo labaatankii Actoobar. Dadka qaar ayaa u qaata abaabulka xafladaha noocaa ah qaadhaan u ururin abaaraha iyo baroordiiq burburkii ummadda Soomaaliyeed iyo indho la’aanta lixdan jirsatay. Qaar kalena waxa ay iska dhaadhiciyaan qulub iska saarid bal si ay in yar oo saacado ah isu illowsiiyaan mashaakilka ka socda dalkii Soomaaliya. Halka kuwayow kalena isdhacsiiyaan in ay yihiin noocyo wacyi galin ah bal si loo baraarujiyo da’yarta si ay wax uga beddelaan mustaqbalkooda nololeed, dibna isu qaabeeyaan. Laakiin waxaa qofkasta layaab, afkala-qaad, dhakafaar, maskax-farad iyo filasho-waa ku noqota marka maykarafoonka iyo fagaaraha loo tartamo, misna lagu margado hadalka midhkiisa macnaha leh, murtidana mooyiba si loo dhuuxo ee loogu dhug yeesho waanada midda qoran iyo ta qubanaha ah. Waxaa lagu masaali karaa shanqadha kabahoodu samaynayaan shuxshux iyo daasado madhan oo gabadh hinaastay isku garaacayso oo madax wareer waxaan ahayn ka qaadi maysid. Sidii ido diday ayaa la isu dhexyaacaa oo la isku wareegaystaa iyaga oo miyir doorsoon. Marna Jabaqda iyo uugaanka waxaad moodaysaa cagaf-cagafyo kayn bannaynaaya oo baabuur karashar ama jay siddaa daba xaawaaraynnayso. Fekerka togan iyo fiiradheerida ku dhisan cilmiga iyo caqliga waxa ay caynnaaniyaan caafimaadka maskaxda bulshada ee caymadka ah. Sidoo kale waxa ay ka hortag u noqdaan ciqaab wadareed ay wadaagi lahayd ummad weyntu. Taa cagsigeeda waxa ay noqonaysaa wax kasta oo kale oo la adeegsadaa mala’awaal ku

binaysan jahli iyo quraafaad aan qiil iyo caddayn toona loo haynnin natiijada ka dhalan kartana lama saadaalin karo waxa ay noqon karto.

“Qiimaha, Qaaya iyo quruxda dadnimadu sida ay u eekaan karto waan garan karaa, waayo, tiraba dhawr goor ayaan ku riyooday oo manaamkaa la i hor keenay, sidoo kale waxaan tifaftir (tafaftir)


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

ku samayn jiray qoraallo ku soo bixi jiray xidigtii Aktoobar bilowgii siddeetanaadkii, sidaa darteed, waxaan in ka badan toban goor sal-dhigtay  gago weyn oo Ruushku ku lahaan jiray Yurubta bari. Halkaa waxaan ku soo qaatay tababarro ku saabsan sida **ayaxa** loola dagaallamo, sababta oo ah dawladdu waxa ay  welwel weyn ka qabtay sida uu u sii shaqayn karo barmaamijkii Sitaadku. Isla baryahaa aan tababbarka ku soo sameeyay ammuuraha aafadan duulluusha ee halista ah, waa markii sida daran ayaxu noogu habsaday," War tabasho iyo faan aannu u kala garan waynay ayuu nagu afuufay nin dhaxanta garaacaysa isku dhaafinaaya hadal wadkii galay oo annaga markaa qiimo badan aan noosamaynayn.

haddana si kasta oo la isugu taxallujiyo in wax la saxo wax uunbaa ka si noqda. Mooji arrinku si uu yahay, Waa wax wada sirgacan oo isuma sin bannaana, haddii ay isu hayaan nafta suurta ayay afuufi lahaayeen goor hore. Cidkasta oo subag iyo sixin haysata waxa ay jeclaan lahaayeen in ay sun isugu beddesho oo sammadaa laga soo doono.  Saacadkasta waxa ay ku fekerayaan siday u suurto galin lahaayeen masiibooyin gacan ku samayn ah. Dagaallada ehliga ahi arlada Soomaalida waxa ay iska noqdeen wax la aqbalay oo caadiya, gawraca iyo ciqaabta macno-la'aanta ahina waxa ay noqotay madaddaalo oo malaha qosolka iyo oohinta farqiga u dhexeeyaa wuu yar yahay oo marmarka qaar ayay isku qaldamaan! Haddii la odhan lahaa farshaxannimo halla idinku mannaysto , maxaad hal-abuuri lahaydeen, malaha jawaabtu waxa ay noqon lahayd: Sun, Sixir iyo waabay ta maska mid ka meeqaan liidata oo aan midh ka reebin makhluuqa ama uummanaha koonkan ku dulnool. Meelaha ay joogaan waxaa lagu gartaa maragna u ah nal iyo iftiin la'aan iyo guddaafadda karoor dhaaftay kanbalkooda. Wax kadeed iyo dhib ah oo ay ku haysaana ma jirto oo waxa ay ka dhigteen dugsi iyo daris, carruurta duriga, duufka iyo duumada midna kama duulo oo sidaas ayuu saxalku isaga saaran yahay, malaha inta ay dhibto ee ka siqsiqdaana waa faro ku tiris. Dusha way ka dhalaalayaan, waana isku dulnoolayaal, xornimada u yaqaan xero kabax, waa dulmadoobayaal maro ku dhag ah oo iyagu isu haysta baroon carab kasoo jeeda oo illaa hadda aan garanayn jidka ay ka soo hayaameen. Waxaa ku badan hanfadaha iyo ma hubsadaha ee isaga laftiisu is burinaaya iyada oo aan doodaa kale loo dalban.

"Waxaan ka codsanaynaa beesha caalamka in ay faraha nagala baxaan."

"Bulshada caalamku hanna soo faro galiso, intaannaan isku dhammaan."

"Waxba iskuma haynnee  dad ayaa innagu dhex jira oo sidaas farta innoogu walaaqaaya."

"Hannalasoo kala gaadho."

"Dad isku dhaqan ah, isku diin ah oo isku af ah ayaynnu nahay"

"Hannala soo kala dhex galo."

"Nimcaa dhulkeenna fadhida."


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**

“Hannalasoo caawiyo.”

“Khayraadka aynnu haysanno cid heli kartaa ma jirto.”

“Gargaar degdeg ah haddaan nala soo gaadhsiin, waxba naga hadhi maayaan.”

“Waligaa iyo Allahaa gaalo gargaar haka sugin.”

“Deeq bixiyaasha, gaar ahaan dawladaha reer galbeed ee barwaaqo sooranka ah, waxaan ka codsanaynnaa in ay il naxariis leh nagu fiiriyaan.”

Waa hadallo si weyn oo laxaad leh isu khilaafsan, fool xumo badani ku dheehan tahay, inta badanna ka soo yeedha hoggaan isku sheeggga soomaaliyeed meel uu joogaba oo aan la garanayn goorta ay go’ayaan ee lala imanaayo wixii lagaga maarmi lahaa baryada, qayllo-dhaanta aan dhammaadka lahayn, habqanka iyo baahida maalin kasta taagan. Ammin walba oo la taagan yahay waxa ay u nisbeeyaan horumar la’aanta iyo mushkuladda ku habsatay ummadda fara-galin shisheeye iyo jaar ku xumaaday kaa oo xagal daacinta ugu weyn ku haya dadkan darxumaysan, malaha si tamar darrada, qorshe-la’aanta iyo caqli xumaanta la isaga riixo, la isuna dhaafiyo si cidkale loogu xawilo, waayo, haddii aad runta aqbasho waxaad ka baqanaysaa in ay fulkaane iyo qarax ba’an mid kood kugu noqoto oo ay gondahaaga dhulgariir ka bilaammo oo aad sidaa ku goblanto, haddii aadan sidaa ku galban oo ayna ku galaafanba.

Khadar Iimaan Cige
Email:Badqas1@gmail.com


**Copyright © 2015 WardheerNews, All rights reserved**